SHARCIYADA MAAMULKA OREGON
MAAMULKA CAAFIMAADKA OREGON, WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
SADARIKA 333

WAAXDA 19

BAARITAANKA IYO XAKAMEYNTA CUDURADA: AWOODAHA GUUD IYO MASUULIYADAHA

333-019-1030
Shuruudaha Talaalka COVID-19 ee Macalimiinta iyo Shaqaalaha Dugsiga
(1) Carruurta waxaa laga rabaa inay tagaan dugsiga, oo ah goob wadareed COVID-19 uu si sahlan ugu faafi karo haddii taxaddar la samayn waayo. COVID-19 wuxuu maraa isbadelo joogto ah isaga oo badanayo, taas oo waqti kadib sababo noocyada aadka u faafi karo ama sababa cudur aad u daran. Laga bilaabo waqtiga sharcigaan la qaatay, Delta ayaa ahaa nooca gaarayo wax ka badan boqolkiiba 98 ee muunooyinka isku xiggo ee Oregon. Nooca Delta ayaa qiyaastii labo illaa sadex jeer aad waxku ool uga ah noocyada nooca daran ee COVID-19. Waxaa jiro cadeyn ka imaaneyso dadka qabo nooca Delta oo inay qabaan isla qaababka fayraska iyada oo aan laga eegin heerka tallaalka ee soo jeedinayo in xittaa dacwadaha sii badanayo ee tallaalka ayaa u gudbin karo noocaan si wax ku ool ah. In aad tallaalnaato, sidaas darteed waa muhiim si looga hortago faafitaanka Delta. Noocyada COVID-19 ayaa ku dhex faafaya dadweynaha aan la tallaalin ee gobolka wuxuuna u horseedayaa kororka kiisaska ugubka ah ee kuwa si buuxda loo tallaalay. Xeerkani waa lagama maarmaan si loo caawiyo xakamaynta COVID-19, iyo in la ilaaliyo ardayda, macallimiinta, shaqaalaha dugsiga, iyo mutadawiciinta.
(2) Wixii ujeedooyinka sharcigaan, qeexitaanada xiggo ayay quseysaa:
(a) "COVID-19" waxaa loola jeedaa cudur uu sababay cudurka daran ee neef-mareenka ee coronavirus 2 (SARS-CoV-2).
(b) "Shaqsiga sida buuxdo u tallaalan" waxaa loola jeedaa shaqsiga qaatay labada garoojo ee tallaalka labada garoojo ee COVID-19 ama halka garoojo ee tallaalka halka garoojo ee COVID-19 iyo in ugu yaraan 14 maalmood laga joogo markii uu qaaatay garoojada ugu dambeysay ee tallaalka COVID-19.
(c) "Ka-reebitaan caafimaad" waxaa loola jeedaa in qofku leeyahay naafonimo jireed ama maskaxeed oo qofka u diidaya inuu qaato tallaalka COVID-19.
(d) “Reebitaannada Diimeed” waxaa loola jeedaa in shaqsigu si dhab ah u haysto caqiido diimeed oo u diidaya qofka inuu qaato tallaalka COVID-19.
(e) “Caddeynta xaaladda tallaalka” waxaa loola jeedaa dukumiinti ay bixiyeen maamulada tuulooyinka, dawladda, gobolka ama dowladda hoose, ama bixiyaha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan magaca qofka, taariikhda dhalashada, nooca tallaalka COVID-19 ee la bixiyay, taariikhda ama taariikhaha la bixiyay, iyadoo ku xiran inuu yahay tallaal hal ama laba garoojo ah, iyo magaca/goobta daryeel-bixiyaha caafimaad ama goobta tallaalka laga qaatay. Dukumeentiyada waxaa ku jiri kara, balse kuma xaddidna kaarka diiwaanka tallaalka COVID-19 ama sawir nuqul ama dhijitaal ah oo kaarka diiwaanka tallaalka ah, ama daabacaad laga helay diiwaanka tallaalka Maamuka Caafimaadka Oregon.

(f) “Dugsi”:
(A) Waxaa loola jeedaa mid guud, mid gaar ah, mid diimeed, jaartar ama barnaamij waxbarasho oo kale oo bixiya xanaanada ilaa fasalka 12 ama qayb ka mid ah.
(B) Micnuhu ma aha barnaamijka xannaanada oo gooni ah oo u gudbo dugsiga xanaanada.
(g) "Barnaamijka ku saleysan dugsiga" waxaa loola jeedaa barnaamij u adeegaya carruurta ama ardayda oo lagu qabta dhismayaasha dugsiga.
(h) "Shaqaalaha barnaamijka iskaa wax u qabso ku shaqeeya iyo mutadawiciin":
(A) Waxaa loola jeedaa qof kasta oo jira 16 ama ka weyn:
(i) Cidda u shaqaysa barnaamij dugsi ku salaysan ama aan u shaqayn laakiin si kale ugu hawlan inay siiso badeecado ama adeegyo barnaamij dugsi ku salaysan iyada oo loo marayo heshiis kasta oo rasmi ah ama aan rasmi ahayn, ha lagu bixiyo ama aan lagu bixin, oo ay ku jirto laakiin aan ku xadidnayn macallimiinta, shaqaalaha maamulka, shaqaalaha daryeelka carruurta, shaqaalaha nadaafadda, tababarayaasha, wadayaasha barnaamijka ku saleysan dugsiga, mutadawiciinta qoyska; iyo
(ii) Bixinta badeeco ama adeegyo ama barnaamij ku saleysan dugsi oo ay ku jiraan xiriir toos ah ama aan toos ahayn oo lala yeesho carruurta ama ardayda.
(B) Loolama jeedo booqdayaasha muddada gaaban ama shaqsiyaadka samaynaya gaarsiinta.
(i) "Macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta":
(A) Waxaa loola jeedaa qof kasta oo jira 16 ama ka weyn:
(i) Ka shaqeeya dugsi ama qof kasta oo aan ka shaqeynin balse ku hawlan inuu bixiyo alaab ama adeegyo dugsi iyadoo loo marayo heshiis rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn, ha lagu baxsho lacag ama aan la bixin, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn macallimiinta, shaqaalaha maamulka, shaqaalaha nadaafadda, tababarayaasha, wadayaasha baska dugsiga, mutadawiciinta qoyska iyo macallimiinta beddelka ah; iyo
(ii) Bixinta alaabo ama adeegyo ama iskuul ay ku jiraan xiriir toos ah ama aan toos ahayn oo lala yeesho ardayda.
(B) Loolama jeedo booqdayaasha muddada-gaaban, shaqsiyaadka samaynaya gaarsiinta, ama xubnaha guddiga dugsiga haddii aysan sidoo kale ka tabarucayn dugsiga.
(3) Kadib Oktoobar 18, 2021:
(a) Macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciintu ma bari karaan, ma ka ashaqeyn karaan, wax kama baran karaan, wax kama daalacan karaan, caawin karaan, eegi karaan, ama uma utadawici karaan karaan dugsiga haddii aan si buuxda loo tallaalin ama aysan bixin dukumiinti caafimaad ama aysan hansan reebitaan diimeed.
(b) Dugsigu ma shaqaalaynsiin karo, heshiis lama geli karo, ama ma aqbali karo adeegyada mutadawacnimada ah ee macallimiinta, shaqaalaha dugsiga ama mutadawiciinta wax bara, shaqeeya, wax barta, wax daalacda, caawiya, eega, ama u mudawacaya dugsi mooyaane in macallimiinta ama shaqaalaha dugsiga si buuxda loo tallaalay COVID-19 ama ay haystaan caddayn caafimaad ama diimeed oo diiwaangashan.
(4) 18-ka Oktoobar 2021 ama kahor, macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta waa inay siiyaan dugsigooda, loo shaqeeyaha ama qandaraaslaha midkood:
(a) Caddaynta tallaalka ee muujinaya qaadashada tallaal buuxa; ama
(b)Diiwaangelinta reebitaanada caafimaad ama diimeed.

(A) Ka-reebitaan caafimaad waa in lagu xaqiijiyaa dukumenti uu saxiixay bixiye caafimaad, oo aan ahayn qofka raadinaya ka-reebitaanka, foomka uu qoray Maamulka Caafimaadka Oregon, oo caddaynaya in shaqsigu leeyahay naafonimo jireed ama maskaxeed oo xaddideysa kartida shakhsiga ee ah inuu helo tallaalka COVID-19 oo ku salaysan baadhitaan caafimaad oo cayiman, oo qeexaya haddii naafonimadu ay tahay mid muddo gaaban ah ama joogto ah.
(B) Ka-reebitaan diimeed waa in lagu xaqiijiyaa dukumiinti, foom ay qortay Maamulka Caafimaadka Oregon, oo uu saxiixay shaqsiga oo sheegaya in shaqsigu codsanayo ka-reebitaan looga baahan yahay tallaalka COVID-19 oo ku saleysan caqiido diimeed oo si dhab ah loo aaminsan yahay oo ay ku jirto bayaan qeexaya habka shardiga tallaalku uga hor imanayo dhawrista diinta, ku dhaqanka, ama caqiidada qofka.
(5) Dugsiyada bixiya reebitaannada tallaalka sida ku cad qaybta (4) ee qaanuunkan waa inay qaadaan tallaabooyin macquul ah si loo hubiyo in macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta aan la tallaalin laga ilaaliyo inay la falgalaan oo faafiyaan COVID-19.
(6) 18-ka Oktoobar 2021 ama kahor,, dugsiyadu waa inay haystaan dukumentiyo in dhammaan macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta ay u hoggaansamaan qaybta (4) ee xeerkan.
(7) Kadib Oktoobar 18, 2021:
(a) Shaqaalaha barnaamijka ku-saleysan dugsiga iyo mutadawiciinta wax ma bari karaan, ma shaqeyn karaan, ma bixin karaan daryeel, barid, daalacasho, caawin, ilaaliyaan, ama u mutaddawici karaan barnaamijka ku salaysan dugsiga haddii aan si buuxda loo tallaalin ama ay keenaan dukumiinti reebitaan ee caafimaad ama diimeed.
(b) Barnaamij dugsi ku salaysan ma shaqaalayn karo, heshiis lama geli karo, ama ma aqbali karo adeegyada mutadawacnimo ee shaqaalaha barnaamijka ku salaysan dugsiga ama mutadawiciinta wax bara, shaqeeya, bixiya daryeel, waxbarasho, waxbarta, caawiya, fiiriya, ama iskaa wax u qabso uga shaqeeya dugsiga barnaamijka ku saleysan haddii shaqaalaha ama mutadawiciinta si buuxda looga tallaalo COVID-19 ama ay haystaan ka-reebitaan caafimaad ama diimeed.
(8) 18-ka Oktoobar 2021 ama kahor,, shaqaalaha barnaamijka ku saleysan dugsiga iyo mutadawiciinta waa inay siiyaan barnaamijkooda ku saleysan dugsiga midkood:
(a) Caddaynta tallaalka ee muujinaya qaadashada tallaal buuxa; ama
(b)Diiwaangelinta reebitaanada caafimaad ama diimeed.
(A) Ka-reebitaan caafimaad waa in lagu xaqiijiyaa dukumenti uu saxiixay bixiye caafimaad, oo aan ahayn qofka raadinaya ka-reebitaanka, foomka uu qoray Maamulka Caafimaadka Oregon, oo caddaynaya in shaqsigu leeyahay naafonimo jireed ama maskaxeed oo xaddideysa kartida shakhsiga ee ah inuu helo tallaalka COVID-19 oo ku salaysan baadhitaan caafimaad oo cayiman, oo qeexaya haddii naafonimadu ay tahay mid muddo gaaban ah ama joogto ah.
(B) Ka-reebitaan diimeed waa in lagu xaqiijiyaa dukumiinti, foom ay qortay Maamulka Caafimaadka Oregon, oo uu saxiixay shaqsiga oo sheegaya in shaqsigu codsanayo ka-reebitaan looga baahan yahay tallaalka COVID-19 oo ku saleysan caqiido diimeed oo si dhab ah loo aaminsan yahay oo ay ku jirto bayaan qeexaya habka shardiga tallaalku uga hor imanayo dhawrista diinta, ku dhaqanka, ama caqiidada qofka.
(9) Barnaamijyada ku saleysan dugsiga ee bixiya ka-reebitaanada shuruudaha tallaalka sida ku xusan qaybta (8) ee qaanuunkan waa inay qaadaan tillaabooyin macquul ah si loo hubiyo in

shaqaalaha barnaamijka ku-saleysan dugsiga ee aan la tallaalin iyo mutadawiciinta laga ilaaliyo inay la falgalaan oo faafiyaan COVID-19.
(10) 18-ka Oktoobar 2021 ama kahor, , barnaamijyada dugsiga ku saleysan waa inay haystaan dukumentiyo in dhammaan shaqaalaha barnaamijka ku-saleysan dugsiga iyo mutadawiciinta ay u hoggaansamaan qaybta (8) ee qaanuunkan.
(11) Dugsi ayaa codsan kara in barnaamijka ku salaysan dugsiga ee ka shaqeeya dugsigaas, uu caddeeyo haddii uu u hogaansamayo, iyo haddii kaleba, xeerkan. Haddii barnaamij dugsi ku salaysan uu codsi sidaa ah ka helo dugsiga, waa inuu ka jawaabaa.
(12) Barnaamij ku salaysan dugsi ayaa laga yaabaa inuu codsado in dugsiga ay damacsan yihiin inay ka hawlgalaan, uu caddeeyo haddii uu u hogaansamayo, iyo haddii kaleba, xeerkan. Haddii barnaamij dugsi uu codsi sidaa ah ka helo dugsiga, waa inuu ka jawaabaa.
(13) Wax xeerkan ka mid ah looma jeedo in laga mamnuuco dugsiyada ama barnaamijyada ku saleysan dugsiga:
(a) U hoggaansanaanta Xeerka Naafada Ameerikaanka iyo Cinwaanka VII (Title VII) ee Xeerka Xuquuqda Madaniga, iyo sharciga gobolka ee u dhigma, shaqsiyaadka aan awoodin in la tallaalo sababo la xiriira xaalad caafimaad ama caqiido diimeed oo si dhab ah loo aaminsan yahay.
(b) Soo rogidda shuruudo xaddidaad ama dheeraad ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn in laga rabo macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta, iyo shaqaalaha barnaamijka ku-saleysan dugsiga iyo mutadawiciinta inay haystaan dukumiintiyo dheeri ah ama kuuro xoojin ah ee tallaalka COVID-19 haddii taasi ay ku taliso Xarunts Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Mareykanka.
(c) Ku soo rogista shuruudahan taariikh hore.
(d) U oggolaanshaha degmo dugsiyeed ama hay'ad kale oo maamusha inay ururiyaan dukumentiyada looga baahan yahay sida ku cad qaybaha (4), (6), (8) iyo (10) ee xeerkan.
(14) Dukumentieynta tallaalka iyo dokumentiyeynta ka-reebitaannada caafimaadka iyo diinta waa in:
(a) Lagu hayo si waafaqsan sharciyada federaalka iyo gobolka ee khuseeya;
(b) La hayo ugu yaraan laba sano; oo
(c) la siiyaa Maamulka Caafimaadka Oregon marka la codsado.
(15) Dugsiyada iyo barnaamijyada ku saleysan dugsiga ee ku xad gudba qodob kasta oo xeerkan ah waxaa lagu ciqaabayaa ganaax madani ah oo ah $500 maalin kasta xad gudub kasta.
Qaanuunka/Maamulka Kale: ORS 413.042, ORS 431A.010, ORS 431.110 & ORS 433.004
Qaanuunada/Waxa kale ee La hirgeliyay: ORS 431A.010, ORS 431.110 & ORS 433.004